

## Cafimaadka caruurta oo lacag la'aan ama qiimo jaban ah



### Akhbaar Wanaagsan

Caruurtaada waxey heli karaan baaritaan caafimaad lacag la'aan ama qiimo jaban ah, laga bilaabo July, 2007. Hadii horey loogu diiday inay helaan caafimaad, hadeer wey heli karaan.

Hadii lacagta soo gasha qoyskaaga bishii ay tahay ama ay ka yartahay inta hoos ku qoran, caruurtaada waxay xaq u yeelan karaan in laga bixiyo caafimaad.

Tirada qoyskaaga (adiga aad ku jirtid)	Xadka loogu tala galay inaad ku heshid bilaash. Haday kusoo gasho bishii.	Xadka loogu talagalay inaad ku heshid qiimo jaban. Haday kusoo gasho bishii.*
1	\$1,734	\$2,167
2	\$2,334	\$2,917
3	\$2,934	\$3,667
4	\$3,534	\$4,417
5	\$4,134	\$5,167
6	\$4,734	\$5,917
7	\$5,334	\$6,667
8	\$5,934	\$7,417
9	\$6,534	\$8,167
10	\$7,134	\$8,917

\*Qiimaha jaban waa \$15 bishii cunugiiba; ugu badnaan \$45 bishii qoyskiiba.

### Sidee u dalban karaa?

Waxaad ka buuxin kartaa waraaqaha xarun kasta oo Public Health ah. Hadii aad wax su'aal ah qabtid, ama aad caawimaad u baahantahay xaga waraaqo buuxinta, ama aadan awoodin inaad soo cadeyso lacagta soo gasha bishii qoyskaaga, lasoo xiriir:

***Kadra Sheik***  
***(206) 461-6910***

